Qodabada booqdayaalka
Nadaamka Booqdayaalka ee NICU, ICC iyo SCN

- Dhamaan waalidiinta mar walba waan soo dhaweynaynaa umana aqoonsanin in ay yihiin " booqdayaal."
- Wakhtiga booqashada dadka kale waa inta u dhaxaysa 9 subaxnimo iyo 9 fiidnimo.
- Waalidiinta iyo booqdayaasha waa in ay maraan Barta soo Dhaweynta si loo siiyo warqadda aqoonsiqa. Qofka aan wadan warqadda aqoonsiga waxaa suurtowda in aysan gali karin qaybta daryeelka bukaan jiifka.
- Waalidiinta iyo booqdayaalka waa in lagu baaraa caafimaadqabkooda Barta soo Dhaweynta maalin walba.
- Booqdayaalka, oo ay ku jiraan walaaluhu, waxaa suurta gal ah in aan loo ogolaan booqashada, haddii ay qandho, hargab, cuno xanuun iyo duuf leeyihiin.
- Waalidiinta ay ka muuqato calaamadaha hargabka way booqan karaan, laakiin waa in ay xirtaan maaskarada.
- Walaalaha waxaa loo yaqaan ilmo kasta oo la nool waalidka bukaanka.

  -Walaalaha ka yar labo sano, waxay booqan karaan 15 daqiiqo oo hal mar ah.
  -Walaalaha jira 2-4 sano, waxay booqan karaan hal mar oo 15 daqiiqo ah maalintii.
  -Walaalaha jira 5-11 sano marwalba way booqan karaan haddii ay caafimaad qabaan.

- Ilmaha 12 jirka ah ama ka wayn waxay booqankaraan wakhtiyada booqashada la ogolyahay.
- Dhererka booqashada-dadka waa weyn ama ilmaha- waxaa xadidi kara kalkaailyada ilmaha iyada oo tixgalinaysa xaalada iyo dulqaadka ilmaha.
- Dhamaan waalidiinta iyo booqdayaasha , waxaa la filayaa in gacmahooda ku mayraan Barta soo Dhaweynta iyo kahor inta aadan galin qolka bukaanka.
- Markiiba afar qof ayaa loo ogolyahay oo ay ka midyihiin waalidiintu.